Magaalada Seattle
Waaxda Dhaqaalaha
Dwight Dively, Agaasime

# TILMAAMAHA DEGGANE EE HANNAANKA MIISAANIYADDA MAGAALADA SEATTLE

## Xukuumadda Magaalada

Magaalada Seattle waxay bixisa adeegyo badan, ay ka mid tahay ilaalis boolis, dab-damis, adeegyada caafimaad ee deg-degga ah, beeraha, maktabado, iyo xoogaa barnaamijyo adeeg aadane. Magaalada sidoo kale waxay bixisa oo ujro kaga qaadata korontada, biyaha, bullaacadaha, dib-u-warshadayn, iyo adeegyada qashin ururin. Magaalada Seattle ma ka shaqaysiiso dugsiyada, kulliyadaha, ama nidaamka gaadiidka dadweynaha. Degmada Dugsiyada Seattle (Seattle School District) waa xukuumad gooni ah oo ka shaqaysiisa dugsiyada dad-weyne. Metro-ga Deegaanka King (King County Metro) waa xukuumad kale oo ka mas'uul ah nidaamka gaadiidka dadweynaha, daawaynta bullaacadaha, iyo maxkamadaha badankood. Xukuumadda Gobolka Washington waxay siisa dhaqaale jaamacadaha, kulliyadaha bulsho, iyo barnaamijyada caafimaad iyo adeegga aadane badankood.

Magaaladu waxay dhaqaale ka hesha, canshuuraha, ay ku jirto canshuuraha hantida-ma-guurtada ah, beeca tafaariiqda lugu gado, iyo ganacsiga. Magaaladu waxay isla markaana ururisa ujro qaar ka mid ah barnaamijyada iyo wax-qabadyada, sida korontada iyo gaaska, barkadaha dabaasha, iyo rukhsadaha qoraal ee dhismo.

## Dhugmo Hannaanka Miisaaniyadda Magaalada

Duqa Seattle wuxuu ka mas'uul yahay maamulidda xukuumadda Magaalada. Sannad kasta Duqu wuxuu soo u jeediya miisaaniyad Guddiga Magaalada. Sagaalka xubin ee ka tirsan Guddiga Magaalada waxay aasaasaan siyaasadda ee xukuumadda Magaalada. Guddiga Magaaladu waxay dib-u hubiyaan miisaaniyadda uu soo jeediyo Duqu, oo wax ka beddelaan, iyo aqbalaan miisaaniyadda ugu-dambeeysa. Ka hor inta aaney cod-bixin, Guddiga Magaaladu waxay qabtaan shir dad-weyne si ay toos u dhegaystaan dadka deggan ee ra'yi ka dhiibanaya sidii loo kharash-garaynlaha lacagta Magaalada. Dadka badankood waxay ahamiyad-saaraan qeybta "Sanduuqqa Guud" ee miisaaniyadda Magaalada waayo qeybtani caadi ahaan waxay masruufta adeegyada xukuumadda magaalada, sida booliska, dab demiska, beeraha, iyo maktabadaha.

Sharciga gobolka Washington ayaa sheegaya in Seattle miisaaniyadeeda loogu tala-galay sannadda soo socota ay soo gudbisso Deesambar 2 ee sannad kasta. Miisaaniyaddu waa iney isku dheelitirantahy, oo ugu yaraan dakhligu iyo kharash-garayntu is-le'eg yihiin. Tirada kharash-garayntu, ee loo yaqaan "qoondayn", waxa la aasaasa goorta miisaaniyadda uu aqbalo Guddiga Magaalada, oo lama beddeli karo la'aanta cod-bixin Guddiga Magaalada ee dheeraadka ah.

## Diyaarinta Miisaaniyadda

Guud-ahaan hawsha miisaaniyadda ee Duqu soo jeedin rabo waxay bilaabanta Febraayo oo dhammaata goorta loo gudbiyo Guddiga Magaalada, badanaaba waa maalinta Isniin ee ugu dambeysa Seteembar. Laba dukumeenti ayaa :la dhiiba: "miisaaniyad" iyo "barnaamij horumarin raasumaal" (CIP).

Miisaaniyaddu waxay masruufta dhammaan shaqa socodsiinta Magaalada. Miisaaniyaddu waa dukumeentaha sharci ahaan u fasaxda Magaalada in ay wax kharash-garayso isla marka Guddiga Magaaladu aqbalo.

CIP-gu waa buug war-bixineed oo la socda miisaaniyadda oo wuxuu bixiya macluumaad la xiriirta dhammaan mashruucyada weyn ee Magaalada. Mashruucyada weyn waa kuwa wax hagaajiya, horumariya ama wax ku dara dhismooyinka Magaalada. Maktabado cusub, hagaajin waddo, jid-mareenno, tuubbooyinka biyaha, horumarinta beeraha, iyo saldhigyada dab-damiska dhammaan waa tusaalayaal matalaya mashruucyada CIP. CIP-gu waxa la qorsheeya lix sano ka hore iyo casriyayn lagu sameeya sannad walba. CIP-gu waa hab wax qorsheyn, oo taageeraya qoondaynta dhabta ah ee laga bixiyey miisaaniyadda.

Diyaarinta miisaaniyadda, Waaxda Dhaqaalaha ee Magaalada (City's Department of Finance (DOF)) waxay ku bilowda miisaaniyad "karashka-aasaasiga", oo ku salaysan waxa kharash ee la filayo inuu ku bixi doono sii wadidda "hawl-qabadyada socda". Hawl-qabadyada socda waxa ka mid ah barnaamijyada iyo adeegyada ay bixisay Magaaladu sannadkii hore, iyo ballan-qaadyada saameenaya kharashyada sannadka soo socda, sida canshuuraha cod-bixiyaashu aqbaleen ee lagu horumarinayo gaadiidka, iyo heshiisyada lala galay shaqaalaha iyo isbeddalka ku dhacay daryeelka caafimaad iyo kharashyo kale.

DOF waxay diyaarisa laba saadaal dhakhli, mid Abriil iyo mid Augusto, oo la isticmaalo marka la go'aaminayo haddii Magaaladu lacag ku filan haysato iyo in kale si ay loo daboolo kharashayada la filayo ee miisaaniyadda "hawl-qabadyda socda". Qiyaasta dakhligu waxay ku salaysantahay khibradda 12 bilood ee hore. Isla marka uu Duqu ogaado qiyaasta lacagta la filayo in la heli karo, isagu ama iyadu waxay go'aamin karaan haddii wax jiro oo u baahan in laga reeboo miisaaniyadda, ama lagu daro, ama haddii ay jirto il dakhli cusub, sida kordhin ujro, oo loo baahanyahay in la soo bandhigo si loo daboolo adeegyo uu Duqu rabo in la bixiyo.

Bisha Maayo, waaxyadu waxay siiyaan DOF bandhig tijaabo ah oo ku codsanayaan isbeddello lagu sameeyo miisaaniyadahooda hadda socda. Cudsigan waxa loo yaqaan "Waraaqaha Qodob Miisaaniyadeed" ama BIP.  BIP waxay tilmaam kooban ka bixiyaaan soo-jeedin dhimid ama kordhin miisaaniyadeed oo gaar ah. DOF iyo Duqu waxay dib-u-eegaan cudsiyadan oo waaxyada bisha Juun nasseexo siiyaan.

Bilawga Luuliyo, DOF waxay ka heshaa miisaaniyado dhammaan waaxyada iyo qorshe CIP ah ay soo jeedisay waaxyadu oo leh mashruuc weyn.

Muddada Augusto, DOF iyo Duqu waxay dib-u-eegaan iyo qiimayn ku sameeyaan qorshaha miisaaniyadeed ay soo jeedisay waaxyadu, kaddibna isku-dheelitiraan kuwaas iyo dakhliga la heli karo. Marka uu Duqu go'aan gaaro, DOF waxay la shaqaysa waaxyada si loo diyaariyo qorshe miisaaniyadeed iyo CIP.

Isla markaana Miisaaniyadda Seattle iyo CIP waxay sharraxayaan sida lacagta deeqaha loo kharash-garayn doono. Magaaladu waxay ka heshaa deeq iyo lacago kale xukuumadaha dawladda dhexe iyo ta gobolka. Deeqaha badankood waxa loogu tala-galay barnaamijyo adeegyo aadane oo cayiman ama mashruucyo gaadiid.

Daba-yaaqada Seteembar, Duqu wuxuu u soo bandhigaa Guddiga Magaalada qorshaha miisaaniyadeed iyo CIP.

## Aqbalaadda Miisaaniyadda

Kaddib marka uu Duqu soo bandhigo qorshaha miisaaniyadeed iyo CIP, Guddiga Magaaladu wuxuu dad-weynaha u furaa kulan dhegaysi si toos ahaan loo maqlo talooyinka dadka meesha deggan. Dabadeedna xubnaha Guddiga Magaaladu waxay ku taliyaan wax qabadyo miisaaniyadeed oo cayiman si ay saaxiibbadood tixgelin u siiyaan talooyinkaas. Kaddib dhegaysiga dadka magaalada deggan, iyo dib-u-eegista iyo qiimaynta qorshaha miisaaniyadeed, Guddigu wuxu go'aamin wixii beddelaad ah oo la rabo in lagu sameeyo qorshaha miisaaniyadeed. Guddiga Magaalada sida caadiga ah wuxuu aqbalaa miisaaniyadda daba-yaaqada Noofembar. Miisaaniyaddu waa in lagu oggolaada cod-bixin aqlibiyad- ugu yaraan shan ka mid ah sagaasha xubnood ee Guddiga. Duqu wuxuu dooran kara inuu yeelo miisaaniyadda Guddiga, diido si qayaxan, ama u fasaxo in ay sharci noqoto saxiixiisa ama saxiixeeda la'aantii. Nuqullada dukumeentooyinka miisaaniyadda ayaa diyaar u ah in dad-weynuhu baaro oo laga heli karo laamaha Maktabadda Dad-weyne ee Seattle iyo shabakadda internetka ee http://www.seattle.gov/financedepartment.

## Ka Dhigidda Codkaaga Mid La Maqlo

Dadka deggan Seattle waxay haystaan dhawr fursadood muddada hannaanka miisaaniyadda Seattle sannad kasta si ay ugu sheegaan Duqa iyo Guddiga Magaalada sida ay lacagtooda doolarka ah u rabaan in loo kharash-gareeyo. Waxa sii dheer shirarka dad-weyne ee gaarka ah uu Guddigu qabto dayr kasta, dadka meesha deggan waxay waaci karaan iyo/ama waraaqo u qori karaan Duqa iyo Guddiga Magaalada biloowga ilaa dhammaadka sannadda. Si saamayn lagu sameeyo qorshaha Duqu soo jeediyey, dadka meesha deggan waxa laga codsanaya in ay la xiriirraan Duqa magaalada goorta ugu horeysa sannadka ee suuroobi karta.

Sidoo kale Guddiga Xaafadaha Magaalada (City Neighborhood Council (CNC)) waxay siiyaan dadka meesha deggan dariiqo kale ay ku bixiyaan ra'yigooda ee ku saabsan miisaaniyadda Magaalada. CNC waa koox talis oo dadka meesha deggan hoggaaminyaan oo xubnihiisu laga soo doortay mid kasta oo ka mid ah 13-ka xaafadood ee degmooyinka Magaalada. CNC wuxu qabtaa shirkiisa miisaaniyadeed ee sannad walba bisha Febraayo. Kaddibna CNC wuxu u diraa Duqa iyo Guddiga Magaalada warqad sharrax ka bixinaysa ahmiyad-siinta miisaaniyadeed ee sannadka. Bilaha Maarso iyo Abriil, guddiyada xaafadaha ayaa shira. Guddiyadu, iyo shakhsiyaadka gaarka ah, waxay si toos ah talooyin u siin karaan waaxyada iyo/ama Duqa oo ku saabsan wixii la xiriira ahmiyad-siintooda miisaaniyadeed.